

Warbixinta ku socota waalidka kuna saabsan Amaanka Caruurta

*In la ahaado waalid mar kastaba ma fududa.
Mid ka mid ah waajibaadkayaga ugu muhiimsan
dhanka xarunta daryeelka caruurta waa in aanu
ka caawino qoysaska sidii caruurtu u heli
lahaayeen deegaan amaan ah oo ay ku koraan.*

Amaanka Caruurta waa hawl dhanka daryeelka caafimaadka caruurta ah taas oo ujeedadu tahay in loo feejignaado arrimaha khatarta ah dhanka deegaanka ilmuu ku korayo oo la tilmaamo taageerada iyo caawimaada saxda ah.

Sidee ayay u dhacdaa?

Adigu waxaad fursad u helaysaa inaad ka jawaabto warsasho su'aalo wadata oo kooban marka aad booqanaysaan xarunta daryeelka caruurta marka ilmuu yahay 6-8 toddobaad, 3-5 bilood, 10 bilood, 18 bilood, 2,5 sanno iyo 4 sanno. Su'aalahan waxay ku saabsanyihiin waxyaabaha raad ku yeelan kara qoysas badan sida istareeska, dhaqaalaha, khamriga iyo dagaalka. Inta booqashadan socoto ayaad idinku la hadlaysaan kalkaalisada caafimaadka oo idinka caawin karta inaad la xiriirtaan dhinacyada ku haboon baahidiina. Daryeelka caafimaadka caruurta waxay xitaa si wadajir ah ula shaqayn karaan daryelayaasa qoyska si qoysaska loogu casumo caawimaad iyo taageero.

Warbixin dheeraad ah waxaa laga helayaa kalkaalisada caafimaadka ee joogta xaruntaada daryeelka caruurta.

Ururada wada-shaqaynta:



Regionala forskningsrådet i Uppsala-Örebroregionen

